Ubedelka geedka garanwaaga xawliga u fidaya khayraad cusub oo daaq xoolaad, tamar iyo cunto ah

Republic of Somaliland
Ministry of Environment & Rural Development

*Isagoo hore u qaatay in ka badan hal milyan oo hektar Somaliland gudeheeda iyo shan milyam oo ah geeska Africa, garanwaagu (*Prosopis juliflora*) waa mushkilad mudnaanteeda ku leh dhamaan wadamada gobolka. Daaqsatadu waxay u arkaan halis laakiin qaar ka mid ah dowladaha iyo ha'yadaha aan dowliga ahayni waxay u arkaan inuu qiimo leeyahay khayraad ahaan waxaanay ku dhaqaaqeen inay ka midha dhaliyaan waxtarkiisa. Kani waa baaq ku socda ha'yadaha caalamiga ah inay arkaan waxtarka mustaqbalka uu leeyahay garanwaagu oo ay ku darsadaan mashaariicda horumarineed ee miyiga.*

Waa maxay Garanwaagu, xageebuuse ka yimi?

Garanwaagu waa nooc kamida geedka loo yaqaan *Prosopis* ee kasoo jeeda Amerikada dhexe iyo koonfureed kaasoo loogu baahiyey dunida adkasiga uu u leeyahyay abaarta, tamarta, daaqa iyo hadhka. Maraykanka iyo Mexico, garanwaaga waxa loo yaqaan *mesquite*, Ameeerikada koonfureed waxa looga yaqaan *algarroba* kaaso laga yaabo in magaca kale ey Somalidu u taqaanaa uu kasoo jeedo, *algharoub*. Nooca caanka ku ah Somaliland ee ku baahay Afrika iyo Asiyaba waa *Prosopis juliflora*.

Raadkii ugu horeeyey ee garanwaagu kuyeesho Somaliland waqtigii isticmaarkii Ingiriisku wuxuu ahaa xiligii dhir yaqaank VDH Dowson ee Bulaxaar bilowgii 1950 naadkii. Tobaneeyo sano gudahood waxa lakeenay Sheekh, Gacan libaax, Lafaruug iyo Berbera. Aad bay u beereen hayadihii deeqaha bixin jirey 1980 kii, iyagoo u isticmaalayey la dagaalanka xaalufka wakhtigii daqaalkii Itoobiya iyo Somalida iyo abaarihii ku xigey.

Xooladhaqato- beeraleyda iyo geedkan duulaanka ah

Garanwaaga waxaa loo keenay awooda uu uleeyahay in u ku noolaado duruufo aad u liita oon dhirta kale ku noolaan Karin. Wuxuu u adkaystaa abaarta, carada liidata iyo biyaha dhanaan, jarista, daaqa waxaanu sameeya xaabo wax lagu karsado, dhaameel ama dimbiil ay cunaan xooluhu. Waa geed cajiib ah laakiin sidaa looma arako.

Duulaanka garanwaagu wuxuu badanaa kabilaabmaa degsiimooyinka hareerahooda iyo wadooyinka dhinacyadooda

Xoolaha ayaa baahiyey iniintiisa oo meelo fogfog gaadhsiiyey isticmaalkiisana cidi may garanayn geedkan laga keeney meel aan la garanayn sidaasaa loogu bixiyey geed jinni. Hadii aan la iska ilaalin xidhadhkiisu dhulkoodhan bay qabsadaan, xoolahana udiidaan daaq waxaanay xidhaan wadiiqooyinka iyo wadooyinka. Beerihii uu qabsadey waa looga tegey, ceelashii way qalaleen markuu dhan walba kaga baxay garanwaagu qodaxdiisuna dad iyo xoolaba waxay ku keentay dhibaato.

Imika, wuxuu kubaahay gobolada Somaliland cidhif walba. 2016 ka dhexdiisii sahan ay qaaday FAO waxay ku qiyaastay in ku dhow 550,000 hektar inuu qabsadey garanwaagu si dhakhso leh na uu u fidayo. Cilmi badhis kasoo baxday Koonfur Afrika ayaa sheegtay in sanad walba uu dhulka kufido garanwaagu 5-15%.

Wadannada kalena, geedkani sidaasu ku yahay, dhibaatadiisuna way kaba sii badan tahay. Gobolka waxa loo filayaa ugu yaraan hal milyan oo hektar oo garanwaayi inay Itoobiya ku yaalaan, Sudan waa lamid, Kenyana kaba sii badan dhulka kalena weeraro aan la qiyaasin buu ku hayaa. Mar haddi uqabsado way adagtah in laga dabar gooyo. Texas, waxay isku deyayeen in babar jaraan in hal qarni ku dhow iyagoo u adeegsadey nooc kastoo mashiin ah iyo kiimikooyin imikaanu ugu badan yahay.

Garanwaaga duulaanka ahi wuxuu qabsadaa dhulkii dhirta xodaxleyda ah ee wadaniga ahi ka bixi jirtey

Laakiin garanwaagu wuxuu kaluu yahay khayraad qiima leh

Ameerika oo uu kasoo jeedo, dadka deegaankii waxay barteen qiimahiisa ilaa xilliyo hore. Dhaameelkiisu wuxuu ahaa cunto asaasi ah qiimaleh oo la kaydiyo si loo isticmaalo siba xilliyada abaaraha dhaadheer. Waxay ka ridqaan daqiiq ay ka sameeyaan cuntooyin nafaqo leh iyo sharaab, waxay si wanaagsan u maamulaan kaymahooda garanwaaga ee qiimaha badan waxaan ka faa;iideystaan dhamaan qaybaha uu ka kooban yahay geedku. Woqooyiga iyo koonfurta Ameerika waxa jira cunto, daaq, shiidaal (*fuel*) iyo meheradaha looxa iyo wershedo ku tiirsan geedka garanwaaga kuwaaso ay noloshooda ka helaan kumanaan qof. Haday aqoontaa cusubi Somaliland soo gaadhaysaa. Hadda waa la bilaabay, waxaana loo baahan yahay in badan oo kale in la qabto si loo faafiyo warka ah garanwaagu wuu qiimo badan yahay.

Horumar cusub

Tobankii sano ee ina soo dhaafay, PENHA, waxay kamid ahayd horseedkii wacyigelinta ka bixinayey ka faaiideysiga garanwaaga Somaliland, iyadoo ay kaalinayaan saxiibo jooga Itoobiya iyo Sudan lana shaqaynayso IFAD iyo FAO iyo Wasaaradda Deegaanka iyo Horumarinta Reer Miyiga. 2016 waxa laqabtay tababar iyo bandhig lagu magacaabay bandhig-waddeed garanwaa (*prosopis roadshow*) ayaa wadanka lagu qabtey kaaso soo jiitey xiiso badan siiba intii bandhigu Hargeysa kasocdey ay dowladda, NGO yada iyo hayadaha Qaramada Midoobey ay maqleen, arkeen, dareemeen oo ay dhadhamiyeen waxsoosaarkii garanwaaga telefiishankana laga soo daayey.

Ku xakameynta isticmaalka ayaa ah furaha

Garanwaaga faafiddiisa waa in la xakameeyaa, geedkana waxa laga helayaa walxo qiimo u leh dadka reer miyiga ah, dadkuse waxaay moodayaan in dhaameelka iyo qodaxdiisuba ay sun yihii geedkana aan weligii la cidhib tirikarin. Waxa si degdega loogu baahan yahay wacyi gelin, bandhig iyo tababar ha noqoto reer miyiga xoola dhaqatada ah ilaa sharci dejinta. Baahida ugu horeysa waa soo ururinta dhaameelka qalalan iyo ridiqiisa iyadoo la sameynayo cunto dadka iyo xoolahaba ah taaso qiima kaloo aad u sareeya leh, yaraynyana faafidda garanwaaga. Kiish walba oo 25 kg ah oo dhaameel ah oo la ururiyo lana ridqaba in ku dhow 50,000 oo iniinood ayaa la burburiyaa ama tankii dhameel ah ee la ridqo laba milyan oo geed oo garanwaa ah ayaa meesha ka baxa. Waxa intaa dheer daqiiqda garanwaagu waxay nafaqo ahaan u dhigantaa qamadida ama gallleyda oo aad ugasii macaan. Baahida labaad waa inaad tustaa sidii lacag looga heli lahaa xagaafidda dhulka garanwaagu qabsadey iyadoo qoriga loo rogayo dhuxul la iibsho. Labadaa arimood oo keliya ayaa ina tusi kara waxtar wax ku ool ah oo xaga kor u qaadida dakhliga reer miyiga isla markaana hoos u dhigaya fiditaanka garanwaaga.

Dadkii tuulaha oo lagu tababarayo inay ridqaan dhimbiisha garanwaaga

Maamulidda dhirta garanwaaga iyo kaymaha

Garanwaaga waa laga nadiifin karaa dhulbeeraadka. Wareyso Abokor Maxamed Cabdi oo laga helo Beerta barwaaqo oo ah Diinqal. Wuxuu ku dhaqmaa hab wax ku ool ah oo lagu nadiifinayo, lagu gubayo laguna beeraya dhir midhood iyo beerid dalag kaleba leh isla markaana wuxuu ka helaa dhuxusha garanwaaga $150 dolar todobaadkiiba. Beeraha iyo sabada gurigaba waxa loo bahan yahay in laga dabar gooyo, kuwa isku baxayna waxay u baahan yihiin qorqorid. Dhirta ugu fiicani waxay u baahan tahay in la qorqoro si ay kor ugu dheerato si hadh, dhaameel iyo looxba looga helo mustaqbalka sida wadamada kale.

Dakhli cusub oo ka yimi garanwaaga

Fursada keliya ee ugu weyn waa in la kobciyo meherado miyi oo cusub dalkaan Somaliland waxay yihiin habaynta iyo iibinta wax soosaarka garanwaaga. Dhuxushu waxay noqon kartaa silsiladda ugu horeysa ee laga faa'iideysto. Waxa tan lagu kobcin karaa iyadoo la bedelo siyaasadda dowladda ee lagu horumarinnayo dhuxusha garanwaaga tan laga shiday dhirta (sida galoolka, qudhaca iwn) taaso ashuurta laga dhimayo iyo suuqyo cusub oo loo raadiyo.

Il dhaqaale oo cusub. Dhuxul garanwaa oo iib utaal Aw Barkhadle

Sheeko ku saabsan guulaha laga gaadhay garanwaaga ee iskaashatada Tawfiiq

PENHA waxay kala shaqaysay garanwaaga bulshada tuulooyinka Geedka Dheenta, Diinqal iyo Aw Barkhadle sanooyin dhawra 2014 kiina waxay ka saaciddey inay sameystaan iskaashato keliya. Tababar waxa lagu siiyey maaraynta meheraddaha, xisaabaadka iyo rasamaalka uu leeyahay waxsoo saarka garanwaagu. Hase yeeshee bulshadu waxay aad uga soo hor jeedey geedkan 'sheydaan'. Waxay u baahnaayeen inay dhuka beeris u xagaafaan waxaanay bilaabeen shidista dhuxusha garanwaaga 2015. Sanad kadib waxay arkeen siduu dakhli cusubi u soo gelayo. Mar aanu tagney beerta nakhal ee tulada Aw Barkhadle 2016 gudoomiyaha iskaashatada Tawfiiq ayaa nooga waramey horumarkay gaadheen. "Waaxaanu leenahay laba kooxood oo min 15 nin ah oo midwaliba soo saarto 200 oo kiish ama gaadhi mugii todobaad walba taaso ku iibsanta $1400. Bal malee, waa waxba la'aan ilaa $2800 todobaad walba. garanwaagu waa lacag".

Daaq xaasil ihi waa cunto xaasil ah

Marka la eego qaybta wadanka ee xoolaha nool iyo siduu ugu tiirsan yahay daaq debedda laga soo dhoofiyo, samaynta Daaqa laga samaynayo dhimbisha garanwaaga oo la ridqay waa raasamaal xoogleh. Waxaase loo bahay yahay makiinado kala duwan , farsamadii lagu habaynayey la isuguna darayey in dadka labaro lana tuso. Kor u qaadida silsiladdan waxsoosaar mala waxa suura gelin lahaa bayacmustarku, oo maal gelin iyo xiiso ay muujiyaan baayac mushtarkiisa. Xubno ka tirsan xukuumada Somaliland iyo ururada qaarkood ayaa leh higsi ay ku arkaan geedkan oo loo bedelay khayraad qiimo u leh dadka reer miyiga ah. Waxay hadda uga baahan yihiin kaalmo badan maalgashadayaasha iyo ha'yadaha caalamiga ah si uu wadanku u gaadho himiladiisa una noqdo tusaale ayku daydaan kuwa kale.

Amsale Shibeshi (ashibeshi@hotmail.com), John Livingstone (jklivingstone@hotmail.com) iyo Nick Pasiecznik (npasiecznik@wanadoo.fr).
PENHA-Somaliland, Juun 2016 (penhasom@gmail.com)